**Warmurtiyeedka Shirweynaha Gurmad ee "Hiigsiga 2016"**

Intii u dhexeysay Maarso 21-22, 2015, xubno ka tirsan jaaliyadda Soomaaliyeed ee Maraykanka iyo Kanada ayaa isugu yimid shirweyne hal-ku-dheggiisu ahaa **"Shirweynaha Gurmad: Raadinta hannaan siyaasadeed oo rasmi ah oo Soomaalidu hagto kaas oo lagu gaaro 2016 iyo ka shishe".** Shirar loo dhanyahay iyo kuwo gaargaar ah ayay ku lafa-gureen sidii lagu gaari lahaa xalaalnimo iyo nidaam dimuqraaddi ah sanadka 2016. Wufuuddu waxay ka doodeen arrimo dastuuri ah iyo kuwo qaanuuni ah iyo sidii loo diyaarin lahaa talooyin kala geddisan oo horseedi kara isbaddel siyaasadeed oo ay Soomaaliya gaarto bisha Agoosto 2016. Wufuuddu waxay tixgeliyeen fadhiidnimada hannaanka siyaasadeed ee Soomaaliya taas oo horseedday xil gudasho la'aan siyaasadeed iyo in lagu guul darraystay fulinta hawlo dastuurka ku qeexan lagana gaabiyay in muwaaddiniinta Soomaaliyeed loo qabto adeegyada dowladda ee ay u baahanyihiin. Khubarada ka qaybgashay shirku waxay kale oo si hufan u qiimeeyeen waxqabadka hay'adaha qaranka ee muhiimka ah sida sharci-dejinta, fulinta iyo garsoorka iyo weliba kaalinta ay ku leeyihiin masiirka dalka shisheeyaha gobolka iyo caalamka intiisa kale.

Markii la soo gabagabeeyay maalintii labaad, shirweynuhu wuxuu soo saaray mabaadii'dan oo gundhig u ah tub loo maro hannaan dastuuri ah iyo weliba hab siyaasadeed oo loogu gudbo 2016.

1. Shirweynuhu wuxuu hoosta ka xarriiqayaa ahmiyadda ay leedahay in la ilaaliyo gobannimada, madaxbannaanida iyo midnimada dalka iyo muqaddasnimada xudduudaha Soomaaliya. Shirku wuxuu kale oo xaqiijinayaa kaalinta udub dhexaadka ah ee ay muwaaddiinta Soomaaliyeed ku leeyihiin aaya-ka-talinta arrimaha dalka; wuxuuna caddaynayaa in dib u heshiisiin siyaasadeed oo dhab ah ay fure u tahay xasillooni iyo nabad waarta oo ka hirgala Soomaaliya.

2. Si loo hubiyo in la helo jadwal siyaasadeed ay Soomaalidu wada leedahay oo looga gudbo 2016, loogana hortago in go'aan ka gaarista hannaanka siyaasadeed ee 2016 ay is lahaysiiyaan dhowr xubnood oo ka tirsan siyaasiyiinta Soomaalida ama dad shisheeye ahi, wuxuu shirku adkaynayaa baahida loo qabo in waqtiga loo kordhiyo hay'adda baarlamaanka si ay saldhig ugu noqoto siyaasad xalaal ah oo la gaaro 2016 oo ay u noqoto hay'adda sida kama dambaysta ah u qeexda danta dalka oo diyaarisa hannaan keena is baddel iyo kala guur bisha Agoosto 2016 ka dhaca Soomaaliya.

3. Shirku wuxuu ku adkaynayaa Guddiga Madaxa-Bannaan ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta ee dhowaan la magacaabay in uu si habsami leh u billaabo, isaga oo kaashanaya Guddiga Kormeerka ee Baarlamaanka, hannaanka dib u eegista

dastuurka oo soo jeediyo talooyin ku saabsan waxyaabaha laga baddelayo dastuurka ee ay tahay in ficil ahaan loo qabto ka hor Agoosto 2016. Waxyaabahan laga baddelayo dastuurka iyo wadatashigaba waa in la iskula meeldhigo hannaan looga gudbo 2016 oo leh sharciyad ka wanaagsan habka uu ku dhisanyahay dastuurka qabyada ah iyo xeerarka is wada diiddan

4. Shirweynuhu wuxuu xusuusinayaa madaxda siyaasadda Soomaaliya in waqtigu sed yahay; sidaas awgeedna, loo baahanyahay in si degdeg ah loo qaado tillaabooyin muhiim ah oo laga doonayo in baarlamaanka iyo dowladdu si dhaqso leh u dhammaystiraan, kuwaas oo ay ka midyihiin:

   i. Samaynta Maxkamadda Dastuuriga ah
   ii. Magacaabista xubnaha Guddiga Adeegga Garsoorka
   iii. Magacaabista xubnaha Guddiga Doorashada Qaranka
   iv. Dhismaha nidaamka siyaasadda axsaabta badan
   v. Dhismaha Guddiga Kahortagga Musuqmaasuqa
   vi. Magacaabista xubnaha Guddiga Xudduudaha iyo Federaalaynta
   vii. Dhismaha Guddiga Qaranka ee Xiriirka Gobollada, iyo
   viii. Dhismaha Guddiga Qaranka ee Dib u Heshiisiinta

   Shirweynuhu wuxuu carrabka ku adkaynayaa in haddii aan hay'adaha dowliga ah si habsami ah loo dhisin ay taasi ka dhigantahay dastuurka oo lagu xadgudbay oo ay weliba u gogol xaarayso in dalku uusan yeelan sharciyad iyo nidaam siyaasi ah oo hay'ado shaqeeya leh, taas oo u fududaynaysa shisheeyahu in ay maamushaan arrimaha siyaasadda Soomaaliya iyagoo ku andacoonaya in ay doonayaan "gorgortan" halkii la mari lahaa nidaam dhisan oo qaanuun leh.

5. Si loo xakameeyo faragelinta ba'an ee shisheeyuhu ay ku hayaan go'aan ka gaarista arrimaha siyaasadda Soomaaliya loona daboolo baahida aqooneed ee hay'adaha dowladda, wuxuu shirweynuhu ku dhiirri-gelinayaa dowladda Soomaaliya in ay raadiso khubaro Soomaaliyeed iyo xirfadyahanno leh aqoon hufan, karti iyo waddaninimo dhab ah oo gacan ka geysta diyaarinta hannaan lagu gaaro isbaddel siyaasadeed 2016ka.

6. Iyadoo la eegayo kalsooni la'aanta guud ee shacabka Soomaaliyeed ay u hayaan madaxda siyaasadda iyo hay'adaha dowladda, wuxuu shirku adkaynayaa in libinta isbaddel siyaasadeed oo Soomaaliya ka dhaca 2016 ay ku xirantahay sida wax looga qabto caqabado badan oo dastuuri ah iyo kuwo sharci ah gaar ahaanna in la sameeyo hay'adaha ay khuseyso hirgelintoodu. Haddaba, shirweynuhu wuxuu ugu baaqayaa dowladda iyo baarlamaanku in ay si degdeg

ah uga wada shaqeeyaan meelmarinta hawlaha dastuuriga ah ee u yaalla iyadoo aan dib loo sii habsaamin.

7. Iyadoo maskaxda lagu hayo in shirweynaha Gurmad uu billow u yahay halgan habaysan oo ay Soomaalidu u galayaan in ay soo ceshadaan in hannaanka siyaasadda ee 2016 iyo ka dibba ay go'aankiisa Soomaalidu lahaato, shirweynuhu wuxuu magacaabay guddi farsamo oo ka kooban aqoonyahanno Soomaaliyeed oo matelaya jaaliyadaha kala duwan si ay u ogaadaan hirgelinta natiijada shirweynaha oo ay uga dhaadhiciyaan shacabka Soomaaliyeed in ay Soomaalidu samaystaan hannaan ay Soomaalidu leedahay oo laaga gudbo 2016.